ÖSTERSUNDS KOMMUN

# Dexter loogu talo galay masuulada.

Amni ka dhig macluumaadka kootadaada

## Waa maxay Dexter?

Dexter waa nidaamka wada xidhiidha u dhexeeya dugsiyada iyo guryaha. Qayb wayn oo macluumaad ah taas oo caadi ahaan laga helo dugsiga ayaa onlayn ahaan laguu diyaariyay.

Masuulada ardayda Degmadda Östersund dugsiyadeeda khasabka ah waxay ka heli doonaan kooto Dexter. Ka dib markaad nidaamka soo gasho waxaad ku arki kartaa macluumaadka guud ee ku saabsan macluumaadka gaarka ah ee ilmahaaga. Nidaamka waxaa lagu maamulaa doorar kala duwan iyo heerarka oggolaanshaha markaas waxaad geli kartaa macluumaadka adiga kula xidhiidha gaar ahaan.

## Waxa aad ka samayn karto Dexter

- Ku gudbi wargelinta jirrada
- ka arag jadwalka
- Ka arag maqnaanshaha oo kooban
- Ka arag qoraalada horumarka maadooyinka
- Ka arag liiska fasalka, iwm




## Soo gal

Waxaad ka soo geli kartaa Dexter cinwaanka soo socda. **(Linkiga waxaa sidoo kale laga heli karaa bogga ostersund.se)**

ostersund.dexter-ist.com

Geli magaca isticmaalaha iyo kelmada sirta taas oo laguu soo diray. Ka dib markaad soo gasho waxaad ku arki doontaa nuqulada guudka kombuyuutarka aaga maamulka iyo liiska hoos u soo dhaca ee aadka dooran karto kaas oo ilmahaagu uu doonayo inuu ku soo gudbiyo wargelinta jirrada ama ka arko jadwalka.

## Xeerka Ilaalinta Xogta (*Personuppgiftslagen*, PUL)

Dexter waxa uu soo bandhigaa macluumaadka nidaamka dugsiga ee diiwangelinta ardayga. Macluumaadkan diiwaangeliyayaasha oo dugsigu ugu baahanyahay masuulada, tusaale ahaan, cinwaanka, kaatalooga fasalka iyo masuulada.

Sarkaalka ilaalinta xogta xaga Maamulka Carruurta iyo Waxbarashadda waxay ka masuul tahay nidaamka iyo diiwaangelinta ardaygu waa:
Martin Westin, 063-14 30 00

## Wargelinta maqnaanshaha

Maqnaanshaha waxaa lagaga warbixin karaa mid uun onlayn gudaha Dexter ka dib marka la soo galo ama abka moobilka, Dexter. Soo gudbinta wargelinta jirrada, waxaad sidoo kale dooran karta sababta maqnaanshaha la wargeliyay iyo taariikhda oo

waxaad riixi *Kaydi (Spara)* oo barraha iyo macalinka ardayga waxay arki karaan inuu ardaygu leeyahay maqnaasho ansax ah maalintaas.




Waxaad haysataa ikhtiyaarka ku wargelinta maqnaanshaha qayb maalinta ah.
Haddii aad isku diiwaangeliso si aans ax ahayn, waxaad tirtiri kartaa diiwaangelinta ilaa inta aanu maclinku diiwaangelin casharka weli.

# Faahfaahinta xidhiidhka

Waxaad beddeli kartaa lambarka telefoonka iyo cinwaanka iimaylka addoo dhagsiinaya *Borofaylkayga (Min Profil)* iyo *Beddel faahfaahinta xidhiidhka (Ändra kontaktuppgifter)*

Lambarka moobilku gaar ahaan waa u muhiim ku shaqaynta wargelinta SMS ee maqnaanshaha aan la oogolaan.

Faahfaahinta cinwaanka waxaa laga helaa diwaanka qaranka oo si toos ah looguma beddeli karo Dexter.

Waxaad sidoo kale dooran kartaa haddii iyo sida aad u doonayso in lagugu wargeliyo haddii ilmahaagu leeyahay maqnaansho aan la oggolaan oo casharka ah.







# Beddel eraygu sirta ah

Waxaad beddeli kartaa eraygaaga sirta ah markaa aad soo gasho Dexter. Dooro *Borofaylkayga (Min Profil) ->* *Borofaylkayga (Min Profil)* ee ku taala liiska. Dooro erayga sirta ah ee ka koboan ugu yaraan 6 xaraf oo ka kooban labbada xarfo iyo tirooyin. Ha ku isticmaalin å, ä ama ö abka Dexter mqnaanshaha maadaama aanay ahayn xarfo la ansixiyay.

Wakhti isku mid ah, deji taariikhda xorta ah ee bandhiga wixii maqnaanshaha. Tani waxay kuu oggolaataa inaad u eegto maqnaanshahaaga si waafaqsan taariikhdii hore oo u dejiso maqnaanshahaaga inta u dhexaysa taariikhaha gaarka ah beddelka todobaadyada go'an.




# Qiimaynta iyo qoralada wada hadalka.

Dexter waxay ka koobantahay qoralada guud ee dhammaan maadooyinka iyo kullamada waalidka-macalinka. Qoraalada waa la kaydiyaa dhammaan sanadaha dugsiga khasabka ee ilmaha. Masuul ahaan waxaad geli karta amacluumaadka kaas oo khabiirka waxbarashado soo




geliyo wakhti kasta. Si loo helo caddaumaha , *dooro kullanka waalidka-macalinka* (Utvecklingssamtal) ee kiiska ku yaal. Halkan waxaad ka heli doontaa *caddaymaha qiimaynta iyo wada hadalka CS (Omdöme & samtalsdokumentation GR)*.

Waxaad u baahan tahay inaad dhagsiiso soo gal si aad u sii wado qoraalada. **Uma baahnid wax faahfaahino dheeraad ah oo soo gelida ah.**




# Su'aalaha kale

### Shakiga faahfaahinta khaladka ah

Marka dugsigu bilaabmo inta badan way adagtahay in lala socdo dhamaan isbeddelada kuwaas oo dhacaya, markaas sidaas awgeed waxaanu rajaynaynaa inaad korka kala socota wixii macluumaad khalada ah gudaha bilowga muddada.

### Taageerada

Haddii aanad awoodin inaad xaliso dhibaatooyinka la xidhiidha Dexter, fadlan la xidhiidh xafiiska dugsiga kuwaas oo kuu gudbin doonaa in dheeraad ah.

### Waxa lumay eraygayga sirta ah

La xidhiidh xafiiska dugsiga oo waxay kuugu soo diri donaa faahfaahinta boostadda (ilaa cinwaanka diiwaanka qaranka).